# Helida Lacagta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah la siiyo

Getting Unemployment



## Shaqadaydii waan ka lug baxay. Ma heli karaa lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo?

Lacagta caymiska Shaqaalaha shaqo la'aanta ah (UI) waxaa la siiyaa dadka shaqadooda ka lug baxa iyagoon khaladka lahayn. Dadka badankiisu waxa ay ugu yeeraan "lacagta Shaqaalaha Shaqo La'aanta." Warqadan xogta aruursani waxa ay bixisaa qaar ka mid ah xeerarka ku saabsan cidda heli karta lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta noqda la siiyo. Hadii aadan hubin inaad heli karto iyo in kale lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo, **waa inaad iska codsataa**. In kastoo ay jiraan xeerar kale, waxaa jira 4 xeer oo aasaasi ah.

## 4 ta Xeer ee Aasaasiga ah ee lagu Helo Lacagta Shaqaalaha shaqo La'aanta ah

**1. Waa khasab inaad ka kasbatay cadad lacag ah oo go'an 1 ama ka badan oo shaqooyin ah.**

Hay'ada lacagta siisa Shaqaalaha shaqo la'aanta ah waxa ay eegtaa muddo 1-sanno ah oo dhamaanta 1 ilaa iyo 6 bilood ka hor waqtiga aad codsato. Kolka aad codsato, waxa aad ku heli boostada warqad la yiraa Oraahda Manfaca Xisaabta. Tan si fiican oo hoose u eeg. Waxa ay kuu sheegi inaad kasbatay lacag ku filan si aad u hesho lacagta Shaqaale la'aanta noqda la siiyo xilliga bilaha ay xisaabinayaan. Iyo inta aad helayso asbuucii haddii laguu ansaxiyo. Haddii akhbaartani aysan sax ahayn, wac Waaxda Shaqada iyo Gargaarka Dhaqaalaha [Department of Employment and Economic Assistance (DEED)].

Beledka ka wac khadka ah, (651) 296-3644
Dibada beledka ka wac khadka ah, 1-(877) 898-9090. TTY: 1-(866) 814-1252

Haddii aadan xaq u lahayn manfaca iyadoo sababtu tahay inaadan sameyn lacag ku filan xaq u yeeladka bilaha ay xisaabiyeen laakiin aad lacag badan sameysay bilihii dambe, wac hay'ada (DEED). Waa ay kula socodsiin karaan haddii ay tahay inaad sugto aadna codsato mar kale si kolkaa bilaha dambe loo xisaabiyo.

**2. Waxa aad ka lug baxday shaqadeedii adigoon aadan lahayn khaladka ka lug bixida.**

Inta qaalibka ah ma aad heli kartid lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta noqda haddii aad shaqadaada ka tagto ama hadii shaqada lagaaga eryo "edeb-darro." awgeed. Waxaa jira waxyaabo ka reebitaano ah oo arintan quseeya. Marmar badan waxaa ku aad heli kartaa lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta la siiyo mid ka mid ah sababahan hoose. Haddii aadan hubin waa inaad iska codsato.

- Shaqadii ma kaa dhamaatay?

- Saacadahaagii ma la jaray?
- Shaqada ma uga tagtay sabab ah in shaqadaadu aysan amaan ahayn ama in qof kuu hanjabayey ama uu wax ku yeelayey adiga?
- Shaqada ma uga tagtay sababtoo ah cudur ama xaalad degdeg ah oo qoyskaaga la soo daristay aadna heli karin fasax?
- Shaqada ma uga tagtay mise lagaaga eryey sabab ah isbedel ku yimid xaaladaada caafimaad ee jirka ama madaxa taa oo ka dhigtay qabashada shaqadaada wax adag?
- Ma ugu tagtay ama ma lagaaga eryey shaqada sabab ah isticmaal daroogo ama khamri?
- Ma xanuunsatay mise dhaawacantay mana ka dhigtay shaqada wax adag taasi? Qof qoyskaaga ka mid ahi ma xanuunsaday mise dhaawacmay?
- Ma wayday ilmo hayntii ama gaadiidkaagii? Qofka madaxda kuu ah ama shaqaalaha kula shaqeeyaa ma ku khashkhashaan adiga ama si xun ma kuula dhaqmaan?
- Ma u qabatay sida ugu fiican ee aad u qaban kartay shaqadaada, laakiin shaqaddii ma la lagaa eryey waayo qofka madaxda kuu ah ayaa waxa uu kuu arkay inaysan shaqadaadu fiican?

**3. Waa khasab inaad shaqo raadiso ka dib kolka aad shaqadaadda ka lug baxdo.**
U tixgeli shaqo raadintaada sidii shaqo saacada buuxa oo kale ah. Geli ugu yaraan 30-saac asbuucii raadinta shaqo cusub. Meel dhigo qoraalada meelaha aad shaqada ka raadisay. Taa waxaa ku jira waqtiga aad galisay:

- goobaha bandhigyada shaqada
- xulafaysiga
- tagida naadiyada shaqada
- la shaqeynta tababare dhanka shaqada ah
- ka raadinta shaqada khadka (online), iwm.



Waa khasab inaad cadeyn karto inaad shaqo raadinaysay haddii (DEED) ay ku waysiiso.

**4. Waa khasab inaad awoodo inaad shaqeyso aadna diyaar u tahay shaqo ka dib kolka aad ka lugu baxdo shaqadaadda.**
Haddii aad cudur qabto ama aad ku muqshuulsan tahay wax kale (sidda iskuul) kuwaa oo kaa hor istaagta inaad shaqo raadiso ama aad shaqeyso, waxaa dhici karta inaadan xaq u yeelan manfacyada.

**Ogow:** Haddii aad qaadato lacagta sooshal sakuuratiga ee (social security) ee (RSDI ama SSI), helida lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo waxa ay noqon kartaa arrin adag. Kala xiriir hay'ada gargaarka dhanka sharciga (legal aid) wixii akhbaar ah ee kale. Ka hel xafiiska deegaanka khadka ah 1-(877) 696-6529.


## Ka hor inta aadan shaqo ka tagin…

→ Marmarka qaarkood, waa aad heli kartaa lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo hadii lagugu khasbay **inaad shaqada ka tagto**. Tusaale ahaan, hadii adiga ama qof kale oo ehel dhow ahí uu qabo cudur weyn ama dhaawac waa inaad u sheegtaa qolada shaqada aadna ka codsataa maciin macquul ah. Taa macnaheedu waa waxa aad ka codsanaysaa isbedelo, sidda fasax oo kale ama isbedel lagu sameeyo waajibkaaga shaqo ee aad gudato, si kolkaa aad u sii haysato shaqadaada. Hadii qoladaada shaqadu aysan waxba sameyn si ay u caawiyaan xaaladaada aadna shaqada ka tagto, waxaa laga yaabaa inaad awoodo inaad hesho lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah.

→ Haddii shaqada jadwalkeeda lagu siiyey aadan sii wadi karin iyadoo sababtu tahay in aadan haysan cid ilmaha kuu haysa, ama gaadiid, waa inaad taa u sheegtaa qoladda shaqada aadna ka codsato maciin ka hor inta aadan shaqadda ka tagin. Maciinku waxa uu noqon karaa waxyaabaha sidda isbedel lagu sameeyo saacadaha ama shaqo aad qaban kartid adigoo guriga jooga. Haddii qofka aadan taa sameyn, waa laguu diidi doonaa lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta la siiyo.

→ Waxaa dhici karta sidoo kale inaad hesho lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo haddii aad dareento inaad shaqada isaga tagto waayo qolada shaqadu wax kama qaban dhibaato culus oo **aad soo sheegtay.** Sida goob shaqo oo aan xaaladeedu amaan ahayn ama hayb-sooc.

Haddii waxyaabo kuwan oo kale ahi ay dhacaan, waa inaad meel ku qorataa waxa dhacay iyo marka ay dhaceen, **waana** inay qoraal ahaadaan wixii ashtako ah ee aad adigu sameynayso. Hubi inaad nuqul kala harto wax walba oo muhiim ah.



**Xusuusnow: waa muhiim in qolada shaqadu ay og tahay dhibaatada lana siiyo waqti ay wax uga qabtaan. Haddii kale waxaa dhici karta inaadan awoodin inaad hesho lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo.**

## Uma <u>badna inaad heli</u> lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo haddii…

→ Uma badna **inaad** heli doontid lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo haddii aad shaqadaada ugu tagto sababo adiga kuu gaar ah ama shaqada oo aadan jeclayn.

→ Waxaa dhici karta in **aadan** helin lacagta Shaqaalaha shaqo la’aanta ah la siiyo haddii qofka madaxda kuu ahi uu yiraa shaqada waxaa lagaaga eryey dhaqan-xummo aad adigu la timid. Dhaqan-xummadu waxa ay noqon kartaa waxyaabaha sida, shaqo u googeynta ama ka soo daahida shaqada marmar badan ah. Sidoo kale waa waxyaabaha sida xatooyada, beenta, dagaalka ku dhex sameynta shaqada ama diidida sameynta wax uu kormeerahaagu ku waydiisto inaad sameyso. Haddii lagu yiraa waxaa ha sameyn aadna aad mar walba nidaamka jabinayso xataa ka dib kolkii laguu digay, qofka madaxda kuu ahi taa waxa uu ugu yeeri karaa taa dhaqan-xummo.

Haddii aad haysato sababo fiican oo ah jabinta nidaamyada ama sameyn la'aanta waxa uu kaa codsaday qofka madaxa kuu ahi inaad sameyso, waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato manfaca. Sababaha fiicani badanaa waxa ay ku saabsan yihiin amaanka iyo hagaagsanaanta shaqaalaha. Haddii aad is leedahay waxa aad sameysay waa wax xaq ah, waa inaad codsataa lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo.

Waxaa dhici karta inaad wali hesho lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta la siiyo haddii aad shaqadda u imaan wayday sababo macquul ah awgood, sida  jiro, ama dhib lama filaan ah oo xagga gaadiidka ah oo kula soo darsa. Haddii aad ugu sheegtay qof madaxda kuu ah kuwaa siddii ugu dhaqsaha badan ee aad awooday.

Waxaa iyana dhici karta inaad hesho lacagta Shaqaalaha shaqada la'aanta ah la siiyo haddii qofka madaxda kuu ahi uu shaqada kaaga eryo wax la xiriira cudur madaxa ah.

## Ma shaqeyn karaa inta ay ii socoto lacagta Shaqaalaha Shaqo la'aanta ah la siiyo?

**Waa aad shaqeyn kartaa saacado yar inta aad qaadanayso lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo.**



Tani waa sidda ay arrintaasi u shaqeyso:

- Haddii aad shaqeyso **in yar 32 saacadood** asbuucii **aadna** kasbato cadad lacag ah oo ka yar kan ay ku siiso hay'ada lacagta siisa Shaqaalaha shaqo la'aanta ah, waxa aad heli kartaa qayb lacagta ka mid ah.
- Haddii aad shaqeeyso **32 ama ka badan** asbuuc **ama** haddii dakhliga guud ee ku soo galaa asbuucii uu la mid yahay ama uu ka badan yahay cadadkaaga lacagta ah ee ay hay'ada Shaqaalaha shaqo la'aanta lacagta siisaa ay ku siiso asbuucii, ma aad heli doontid lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo asbuucaa.

Runtii aad ayey muhiim u tahay adigu inaad soo sheegto dhamaan wixii lacag ah oo aad kasbato oo dhan asbuuca aad kasbatay, ee aadan soo sheegin asbuuca lacagta lagu siiyo. Soo sheeg asbuuc walba kolka aad dalbanayso lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo ee asbuuclaha ah. Soo sheeg wixii aad ka kasbato dhamaan shaqooyinka oo dhan, xataa haddii ay yihiin shaqooyin ku meelgaar ah ama kuwo shaqo saacado yar ah.  Xataa kirada lagaaga dhimo sarta aad ku jirto ka shaqeynteeda waa la xisaabin. Soo sheeg wixii aad kasbato oo dhan xataa hadii aad is leedahay Xafiiska Shaqaalaha shaqo la'aanta ah jaa waa uu og yahay shaqada.

Hadii aadan soo sheegin dhamaan wixii aad kasbato oo dhan ama dakhli kale, lacag khalad ah oo dheeraad ah ayaad heli. Waana inaad dib u siiso lacagtaa khaladka lagugu siiyey Xafiiska Shaqaalaha shaqo la'aanta lacagta siiyo. Waxaa kaloo dhici karta inaad bixiso ganaax khaa'inimo awgeed ah iyo waliba dulsaar. Eeg warqada xogta aruursan ee *Lacag Khalad u Siinta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah*.

Kiis walbaa waa ka duwan yahay kuwa kale. Wac markiiba xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) si aad ugala hadasho kiiskaaga. Ka ogow xafiiska deegaankaaga khadka ah 1-(877) 696-6529.

## Lacag intee ah ayaan heli?

Lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo waa qiyaastii boqolkiiba 50 lacagtii aad ku shaqeyn jirtay ilaa iyo inta ugu badan ee gobolka oo ah $948.

## Xareysiga Lacagta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah

**Markiiba xareyso sheegashaada lacagta**. Mar walba oo aad sii sugtaa waa mar walba oo ay qaadan muddo inaad hesho wax lacag ah. Wax lacag ah laguma siinayo gabi ahaanba waqtiga u dhaxeeya maalinta shaqada kuuga dambaysa iyo asbuuca aad xareysato. Sidoo kale, waxaa jirta muddo 1 asbuuc oo sugid ah ka hor inta aan wax lacagta ah laguu bilaabin.

Sida ugu dhaqsaha badan ee lagu xareysto lacagtu waa khadka (online) ee barta http://www.uimn.org/. Waxaad sidoo kale ku xareysan kartaa telefanka. Beledyada, ka wac khadka ah (651) 296-3644. Dibada baladyada ka wac, 1-(877) 898-9090. TTY: 1-(866) 814-1252.

**Soo wada aruuri dhamaan akhbaarta shaqooyinkaaga:**

- Lambarka sooshal sakuuratigaaga (social security)
- Magaca iyo ciwaanada qolyaha shaqada ee aad u soo shaqeysay 18 kii bilood ee la soo dhaafay iyo mudooyinka aad ka shaqeysay shaqo walba.
- Sababta shaqooyinkaasi u dhamaadeen
- Wixii warqado ah ee aad ka haysto qoladaada shaqada ee sharxaya sababta shaqadu u dhamaatay

## Muddo intee le'eg ayaan heli karaa lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah?




Badanaa waxa aad heli kartaa in u dhiganta ilaa iyo 26 asbuuc oo ah lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta noqda la siiyo, laakiin waa inaad ku isticmaasho hal sanno gudaheed laga bilaabo maalinta aad codsato.

Asbuuc walba waxaa aad u baahan tahay inaad gasho xisaabtaada ama aad wacdo xafiiska aadna codsato lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo.

In kastoo aad heli kartid lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo kaliya 26 asbuuc, waxa uu u baahan tahay inaad xusuusnaato inaad ka cusboonaysiiso akhbaartaada la soo xiriirida shabakada (website) muddo 4 sanno ah. Haddii aadan uga soo jawaabin hay'ada DEED 45-cisho gudahood ogaysiiska ay kuu soo dirto, waxa aad dhumin xaquuqdaadda racfaanka.

## Racfaan ma Qaadan Karaa?

**Racfaan waa aad qaadan kartaa haddii lacagta shaqaalaha shaqo la'aanta noqdo laguu diido, lagaa yareeyo, lagaa jaro ama aadan ku raacsanay Oraahdaada Manfacyada.** Waxaa aad heli warqad kolka lacagtaada Shaqaalaha shaqo la'aanta la siiyo laguu ogolaado ama laguu diido ama haddii ay jiraan wax isbedelo ahi. Waxa aad ku qaadan kartaa racfaanka khadka (online) ka, ama adigoo warqad boostada soo dhigaya ama adigoo faaxsi soo diraya. Akhbaarta waxa la sameynayo waxa ay ku qoran tahay warqada laguu soo diro.

Waxa aad haysataa 45-cisho oo aad racfaanka ku qaadan karto. Ha sugin ilaa iyo maalinta ugu dambeeysa si aad u xareysato racfaan. Hadii aad gafto mudadda la iska rabo in lagu soo xareysto racfaanka sabab **kasta** ha noqoto gafiduye, racfaankaaga waa la iska dhaga-tiri. Hubi in aad nuqul kala harto warqada racfaanka. Hay'adu waxa ay qaban balan ay telefoonka dacwadaada ku dhagaysanayso, waxa ayna kuu soo diri warqad arrintaa ku saabsan. Hubso inaad siiso telefan sax ah qolada dacwada dhagaysigeeda qaadaysa. Hubi inaad telefanka ka jawaabto waqtiga dhagaysiga dacwada! Hadii aadan ka jawaabin telefanka, waxa aad dhumin fursadaadda aad racfaan ku qaadan karto.

## Haddii aad Leedahay Dhaco Dhagaysi

- **Soo wada aruurso cadeymahaaga oo dhan** – Akhri warqada aad ka hesho xafiiska Shaqaalaha Shaqo la'aanta ah lacagta siiyo ee ku saabsan sababta ay qolada shaqadu u qabto inaadan helin lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo, ama sababta manfacaaga loo yareeynayo ama loo jarayo. Faaxsi ama boosto ahaan ugu soo dir xaakimka wixii qoraal, oraah dhaqtar ama cadeymo kale ee qoran ah. Waxa aad ka heli nuqul wax kasta oo qofka madaxda kuu ahi uu soo gudbiyo, laakiin waa inaad si toos ah gaar ugu waydiisato magacyadda makhraatiyaasha. Sii qoro waxyaabaha aad doonayso inaad sheegto xilliga dacwada la dhagaysanayo, si kolkaa aadan waxba u hilmaamin.

- **Ka Caawinta Sharciga** – Khasab kuguma ah inaad qareen **haysato**, laakiin waa ay ku caawin kartaa taasi. Ugu yaraan kala tasho qareen sida ay tahay inaad adigu u qaabisho dacwo dhagaysiga. Ka wac xafiiska gargaarkaaga sharciyada (legal aid) khadka ah 1(877) 696-6529 si aad caawimaad ama u gudbin qolo kale aad uga hesho.



Hadii racfaankaaga aadan ku guulaysan, waxaa dhici karta in lacag siyaado ahí ay ku raacday. Taa macnaheedu waa inaad dib u bixiso wixii lacag ah ee aad heshay. Eeg xogtayada aruursan ee ku jirta barta *Lacag Khalad u Siinta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah.*

Wixii akhbaar kale ee ku saabsan racfaanada, ka eeg khadka (online) https://www.uimn.org/applicants/howappeal/index.jsp ama wac (651) 296-3745.

## Akhbaar quseeysa Muhaajiriinta

Ma aad HELI KARTID lacagta caymiska ah ee Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo haddii aadan haysan ogolaansho aad uga shaqeyn karto wadanka United States.

Haddii aad haysato ogolaansho aad ku shaqeyn karto, waxaa aad HELI kartaa lacagta Shaqaalaha shaqo la'aanta la siiyo. Waa aad cadeyn kartaa inaad haysato ogolaansho aad ku shaqeyn karto haddii aad:

- tahay qof ku leh sharci degnaansho wadanka
- aad haysato fiisaha (visa) ruqsadaha shaqada, ama
- aad haysato warqadda ogolaanshaha shaqadda

Marka ay xisaabinayso lacagta la siiyo Shaqaalaha shaqo la'aanta ah, dowladdu kaliya waxa ay xisaabisaa wixii shaqo ah ee aad qabatay intii aad haysatay ogolaashaha waqada shaqada.

Manfacyada Shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo ma xisaabiyaan wixii cayr ah ee qaadato (public charge rule).

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**